

DUGSIGA DAGMADA MAGAALADA SALT LAKE  
HABABKA BADBAADINTA AY HELI KARAAN WAALIDIINTA IYO ARDAYDA  
SIDA HOOS TIMAADO QEYBTA 504/ADA

Inta soo socoto waa liis ku saabsan hababka badbaadinta la heli karo sida hoos timaado Qeybta 504, Sharciga Mareykanka Itaalka Darran (Americans with Disabilities Act), Sharciga Baddalaadda Mareykanka Itaalka Darran (Americans with Disabilities Amendments Act) ee 2009 iyo Sharciga Aqoonta Qoyska iyo Xuquuqda Asturnaanta (Family Education and Rights to Privacy Act). Waa in la tixraaco siyaasadaha guddiga Dugsiga Dagmada Magaalada Salt Lake G-18 iyo G-19 marka la soo sheego in takoor uu meel ka dhacay.

Waxaad xaq u leedahay:

1. In cunugaada uu ka qeybqaato iyo in uu manafacaad ka helo barnaamijyada waxbarashada dadweynaha iyo in uusan la kulmin takoorka ku saleysan itaal darrida.
2. In uu dugsiga kaala taliyo xuquuqda aad leedahay ee hoos yimaada sharciga federaalka.
3. In aad heshid ogeysiis ku saabsan aqoonsiga, qiimeynta, barnaamijka, ama meeleynta cunugaada.
4. In lagu siiyo go'aanada qiimeynta, waxbarashada, iyo meeleynta sida ku saleysan ilo laga helo macluumaad kala duwan, iyo shakhsiyaadka yaqaaan ardayga, itaal darrida, xogta qiimeynta, iyo fursadaha meeleynta.
5. In aad ka qeybgashid qiimeynta hore iyo meeleynta adeegyada iyo fududeynta la siiyo cunugaada.
6. In cunugaada la siiyo waxbarashada dadweynaha lacag la'aanta ah ee ku habboon. Tan waxaa ka mid ah xaq uu u leeyahay in uu wax la barto ardayda kale ilaa inta ugu badan ee ku habboon. Waxaa kaloo ka mid ah xaq uu u leeyahay in dugsiga sameeyo fududeyn macquul ah si cunugaada loogu ogolaado fursadda siman si uu uga qeybgalo hawlaha la xariira dugsiga.
7. In cunugaada wax lagu baro dhismo iyo in uu helo adeegyo la barbar dhigi karo kuwa la siiyo ardayda aan qabin itaal darri.
8. In cunugaada uu helo fududeyn macquul ah sida hoos timaado Qeybta 504, Sharciga Dayactirka (Rehabilitation Act) ee 1973 ama waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xariira haddii isaga/iyada loo arko in uu xaq u leeyahay sida hoos timaado Sharciga Waxbarashada Shakhsiyaadka Itaal Darran (Individuals with Disabilities Education Act) (IDEA).
9. In cunugaada la siiyo fursadda siman si uu uga qeybgalo hawlaha aan waxbarashada ahayn iyo kuwa ka baxsan manhajka uu dugsi bixiyo.
10. In la baaro dhamaan diwaanada munaasabka ah ee la xariira go'aanada ku saabsan aqoonsiga cunugaada, qiimeynta, barnaamijka waxbarashada, iyo meeleynta.

Haddii ay kula tahay in cunugaada la takooro taasoo ugu wacan itaal darridiisa/itaal darrideeda, waxaad heli kartaa hababka go'aaminta muranka ee soo socda:

**Ashtakada Rasmiga:** Ashtakada rasmiga waxaa waqti kasta bilaabi kara ardayda, waalidiinta, ama ilaalayayaasha. Habka ashtakada rasmiga waxaa la soo geliyaa dhamaan goobaha dagmada iyo bogga internetka dagmada. Foomka ashtakada waxaa laga codsan karaa shaqaalaha dagmada ama waxaa laga soo dagan karaa bogga internetka dagmada [www.slcschools.org](http://www.slcschools.org) (Go to Policies-General Policies – G-19: Discrimination, Harassment, and Retaliation Prohibited – Complaint for Equity and Compliance) (Tag Siyaasadaha – Siyaasadaha Guud—G-19: Takoorka, Kadeedka, iyo Aargudashada Mamnuuc - Ashtakada Sinaanta iyo U Hoggaansamida).

**Habka Xallinta Ashtakada** Haddii habka ashtakada ku guul dareysato in ay gaarto xal raali laga yahay, ardayga, waalidka ama ilaalayaha waxay bilaabi karaan habka xallinta ashtakada marka ay,

waqtiga ku habboon, ku buuxiyaan foom qoran oo ku saabsan Codsiga Arrinta iyo Xalka (Concern and Resolution Request) ee la xariira siyaasadda guddiga G-18: Habka Xallinta Ashtakada (Complaint Resolution Process) waxaa laga helaa bogga internetka dagmada [www.slcschools.org](http://www.slcschools.org). Guddiga wuxuu ardayda, waalidiinta, iyo ilaaliyeyaasha ku dhiiri geliyaa in ay raadiyaan xal aan rasmi ahayn oo ku saabsan arrimahooda, xataa kaddib marka habka la bilaabo. Haddii arrimaha la xalliyo, waqti kasta, waa lala noqon karaa Codsiga Arrinta iyo Xalka (Concern and Resolution Request).

**Codsiga Dhageysiga Sharciga (Due Process Hearing Request):** Habka Sharciga waxaa lagu sifeeyaa in ay tahay fursad lagu xalliyo muranka ka dhexeeyo waalidinta iyo dugsiyada kuna saabsan go'aanka la gaaray iyo/ama hababka uu dugsiya isticmaalay sida hoos timaado Qeybta 504. Waalidka ama ilaaliyaha wuxuu codsan karaa dhageysiga sharciga aan dhana u eexan iyo in fursadda ka-qeybgalka la siiyo dhexdhexaadiye ku kaalmeeya xallinta arrimaha. Waa in la soo dalbado codsiga dhageysiga habka sharciga loona gudbiyo Maamulaha. Codsiga waa in lagu soo daro:

- a. Magaca, cinwaanka, iyo nambarka telefoonka maalinta uu qofka codsanaayo dhageysiga habka sharciga
- b. Magaca ardayga iyo dugsiya uu iminka tago
- c. Oraah ku saabsan masalada, kana mid ah xaqiiqadaha lagu saleyay oraahda
- d. Sharaxaad ku saabsan sida ashtakoolaha u aaminsan yahay in la jebiyay Qeybta 504
- e. Talada la soo jeediyay si loo xalliyo mas'alada

Waxaad kaloo ashtako rasmi ah u gudbin kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga (Office for Civil Rights). Macluumaadka lagala xariiro Xafiiska Xuquuqda Madaniga (Office of Civil Rights) gobolka waa:

U.S. Department of Education  
Office for Civil Rights, Region VII  
Federal Building, Suite 310  
1244 Speer Boulevard  
Denver, Colorado 80204-3582  
303-844-5695

<http://www.schools.utah.gov/equity/Civil-Rights-Information.aspx>

Dugsiya Dagmada Magaalada Salt Lake ma sameyo takoor ku saleysan da', midab, itaal darri, lab/dhedig, aqoonsiga lab/dhedig, asal qaran, xaamilonimo, isir, diin, ama kacsiga qofka xagga barnaamijyada iyo hawlaha uu qabto, marka laga reebo halka ay ku habboon yahiiin iyo inta sharciga ogol yahay. Qofka soo socda waxaa loo magacaabay in uu ka shaqeeyo su'aalaha iyo ashtakooyinka ku saabsan takoorka, kadeedka, iyo aar gudashada la mamnuucay:

Tina Hatch, Investigations and Compliance  
440 East 100 South  
(801) 578-8251  
Salt Lake City, Utah 84111  
[tina.hatch@slcschools.org](mailto:tina.hatch@slcschools.org)